Nidaam doorasho madaxbannaan oo khuseeysa guryaha gaarka ah ee dadka waayeelka ah

Degmada Hamstad waxay isticmaalaysaa, sharci nidaam doorasho madaxbannaan oo si gaar ah u khuseeya guryaha dadka waayeelka ah (LOV) (dadka ka waaweyn 65 jir), guryaha dadka waayeelka ah ee qaybta dadka maskaxda dhiman ama kuwa aan maskaxda dhinayn. Taas macnaheedu waxa weeye haddii aad adigu haysato go'aan ka yimid qofka gacanyaraha ama xoghaynta caawimada gacanta ku haysa go'aankaas oo ku saabsan boos sigaar ah loogu talagalay dadka waaeyeelka ah markaa waxaad xaq u leedahay inaad doorato guriga aad deggeyso kadibna waxaad sugaysaa ilaa iyo inta boos bannaan laguu helayo oo markaa lagugu soo casumayo guriga aad adigu codsatay.

Xadaynta nidaamka doorashada

Waxa laga dhaafayaa dadka deggen takhtarka/muddada gaaban, dadkaas oo aan gurigoodii ku laabankarin inta ay sugayaan booskii guriga deeggaanka ee ay codsadeen. Markaa waxa lagu siinayaa markuu boos bannaani soo baxo kadibna waxaad haysataa fursad aad ku bedelankartid booskii guriga ee aad doonayso.

Dadka ay da'doodu ka yartahay 65 sannadood kuwaas oo codsanaya guryaha gaarka ah ee dadka waayeelka ah waa laga dhaafayaaa doorashada madaxabannaan. Dalabka codsiga waxa laga samaynayaa gacanyaraha ama xoghaynta caawimada bixisa maadaama ay iyadu baahida baarayso wixii intaa ka dambeeyana ay go'aan oggolaansho ama diidma ah arrinta ka gaarayso.iyo haddii ay suurtagal tahay inay guddida daryeelka guryuhu ay ku meeleeyaan.

Guryaha gaarka ah ee dadka waayeelka ah loogu talagalay waxa oggolaaday oo ansaxisay degmada

Degmadu waxay go'aansatay shuruudaha looga baahan yahay shirkadaha ama cida kale ee guryaha gaarka ah gacanta ku haynaysa waxyaaba looga baahnaa inay soo buuxiyaan
si loogu ansaxiyo ama loogu oggolaado inay hawshaas qabankaraan. Si markaa loosugo daryeel caafimaad oo tayo wanaagsan leh. Degmadu waxay si joogto ah ula soconaysaa hawlaha ay qabanayaan cida shaqada ama hawsha qabanaysa.
Gacanyaraha ama xoghaynta caawimada bixinayaa wuxuu ku wargelinayaa arrimaha khuseeya nidaamka doorashada madaxabannaan iyo guryaha gaarka ah ee la doorankaro.

Guryaha gaarka ah ee dadka waayeelka ah ee degmada ku yaala

Haddii aad adigu tahay qof aad ugu baahan daryeel caafimaad oo ay jiraan sababo kala duwan oo aanad gurigaagii ugu noolaankarin waxaad codsankartaa inaad u guurto guryaha gaarka ah.
Guryaha gaarka ah waxa oggolaanaya qofka xoghaynta ah ee caawimada bixinaya iyada oo ka ambaqaadaya baahidaada shakhsinimo. Gurigaas gaarka ah waxaad adigu ka heleysaa caawimo shaqaalaha daryeelka habeen iyo maalinba, waxa kale oo halkaa ka shaqeeya kalkaaliyeyaal caafimaad, dadka ka shaqeeya dhaqdhaqaaqa iyo tababarka xubnaha jirka (fysioterapeuter) iyo kuwa ka qabta shaqada tababarka jirka (arbetsterapeuter).
Marka adiga lagu siiyo meel gaar ah waxaad leedahay guri ama hal qol oo ay taalo sariir lagugu daryeelayo iyo saabaan kale ama alaabta guriga la dhigto oo aad adigu si gooni u leedahay waxaanad isticmaalaysaa dhar sariireed oo aad adigu leedahay. Waxa jira qol siwadajira loo wada joogikaro iyo waxyaabo aktiifiteetyo ah iyo xilliyo cunto la cunikaro. Gurikastaba waxa laga bixinayaa warbixin ku saabsan kirada guriga, noocyada tiifiiga la daawankaro iyo internetba. Macluumaadka ku saabsan caymiska guriga waxaad kala xiriiraysaa shirkada caymiska gurigaaga

.

Sidan ayaad adigu samaynaysaa doorashadaada

Codsiga arjiga ee guryaha gaarka ah waxaad ku soo lifaaqaysaa warqadda arjiga la socota kadibna waxaad u diraysaa qaybta caawimada bixisa.
Qofkii aan awoodin ama qofka iska daaya inuu sameeyo (avstå) doorashada gaarka ah ee guriga waxa markaa qofkaa lagu casumayaa marka ay dhacdo in lahelo fursad boos guri oo bannaan (marka aanu qofku ikhtiyaar uu ku doorto lahayn/aan cayinayn) (icke val alternativ/ospecificerad). Waxa jirta fursad uu qofku deeggaanka guriga ku bedelikaro, waxa markaas lala xiriirayaa qofka guriyaha qaabilsan ama xoghaynta/ gacanyaraha caawimada bixinaya ee arrinta gacanta ku haya.

Qaybinta deeggaanka guryaha gaarka ah

Qofka degmada u qaabilsan deeggaanka guryaha gaarka ah ayaa kugu soo casumaya marka uu boos bannaanaado. Soo gelitaanka guriga- iyo kabixitaanku wuxuu dhacayaa iyada oo aanu qofku wakhti sugin. Markuu qofku guriga soo deggeyo shaqaalaha ka kala shaqeeya guryaha kala duwan ayaa warbixin wax ku ool ah (praktiska frågor) qofka warbixin siinaya, su'aalaha ku saabsan kirada iyo waxyaabo kale.

Kharshka deeggaanka guryaha gaarka ah

Hadaad adigu tahay qof deggen guriga dadka waayeelka ah loogu talagalay waxaad guriga ka bixinaysaa kiro, kirada warbixinteeda waxa bixinaya shaqaalaha guryaha kala duwan ka shaqeeya. Waxa intaa dheer inuu qofku bixiyo kharashka qofka lagu daryeelayo iyo kharashka cuntada.

Faahfaahinta xiriirka

Waxa si toos ah loogala xiriirayaa gacanyaraha/xoghaynta caawimada bixinaysa ama qofka deeggaanka guryaha qabilsan/mas'uulka degmada Halmstad telefoonka tooska ah 035-13 70 00. Macluumaad faahfaahsan ee ku saabsan shirkadaha ama cida adeegga fulinaysa waxa laga helikaraa meelihii lagu soo bandhiga iyo bogga internetka.

Foomka doorashada iyo macluumaad dheeraad ahba waxa laga helikaraa bogga internetka ee degmada Halmstad: www.halmstad.se